



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay: <https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Maarso 2, 2022

Ku socota: Daryeel Bixiyayaasha iyo Hawl wadaagayaasha

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS)

Ujeedada: Shuruudaha tallaalka ee loogu talagalay Guryaha Koox ahaanta Loo degan yahay ee ODDS iyo Daryeelka Guriga Dadka Waayeelka ah

Guddoomiyaha gobolka ayaa ku dhawaaqday in ay qaadayso Amarka Fulineed ee 20-03. Amarkani fulineed ayaa ku dhawaaqay xaalada degdega ah ee cudurka baahsan ee COVID-19 wuxuuna jiray tani iyo horraantii 2020. Intaasi waxaa dheer, in Guddoomiyaha gobolku ay qaadi doonta Amarka Fulineed ee 21-29, kaasi oo ah shuruudaha tallaalka oo loogu talagalay shaqaalaha gobolka.

Tallaalka COVID-19, ama wax iska reebida dhanka caafimaadka ama diinta ee la oggolaaday, ayaa wali looga baahan yahay daryeel bixiyayaasha goobaha ODDS sida guryaha koox ahaanta loo degan yahay 24-ka saacadood, daryeelka guriga dadka waayeelka ah ee I/DD iyo guryaha SACU sida uu dhigayo xeerka daryeelka caafimaadka ee Maamulka Caafimaadka Oregon. Daryeel bixiyayaasha goobaha guriga-dhexdiisa ah ee ODDS, sida shaqaalaha taageerada shakhsiyeed, ayaa si weyn loogu dhiirigeliyaa in ay qaataan tallaalka COVID-19 si ay illaaliyaan dadka ay taageeraan, laakiin la iskagama baahna.

Sida lagu faahfaahiyay [farriintaa Febraayo 15](#), shuruudaha maaskaraha ee loogu talagalay goobaha ODDS, oo ay ku jiraan adeegyada guriga-dhexdiisa, ayaa sii jiri doona xataa ka dib marka shuruudaha gobolka ee goobaha dadweynaha ee gudaha ah ay joogsadaan ka dib Maarso 11, 2022.

Waad ku mahadsan tahay taageerada joogtada ee caafimaadka iyo badbaadada dadka reer Oregon ee qaba naafanimada maskaxda iyo korriinka.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty  
Agaasimaha  
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

*Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa*  
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo [www.oregonrelay.com](http://www.oregonrelay.com) ama [www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers](http://www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers).